


Suaalaha badanaa ay is weydiyaan kiraystayaasha ku nool agagaarka 139 Highett Street iyo Richmond walk-ups

20-ka Sebteembar 2024



Somali | Soomaali

Maxaa maanta lagu dhawaaqay?

Dawladda Victoria waxay ku dhawaaqday goobaha xiga ee dayactirka lagu sameyn doono iyadoo qayb ka ah Mashruuca Weyn ee Guriyeynta Victoria. Goobahani waa:

- 139 Highett Street, Richmond
- 259 Malvern Road, South Yarra
- 6 iyo 8 Anderson Court Richmond
- 1 - 5, 7 iyo 9 Williams Court Richmond
- 111, 119 iyo 127 Elizabeth Street Richmond.

Warbixintan lagu dhawaaqay maxay aniga iiga dhigan tahay?

Tani waxay ka dhigan tahay in kireystayaasha ku nool goobahan ay bilaabi doonaan wadahadalka ku saabsan raritaanka, si markaas loo bilaabo dib-u-dhiska, iyo in la dhiso guryo bulsho oo cusub.

Howlaha raritaanka waxay soo gebagaboobi doonaan **bish Febraayo ee sanadka 2026**. Dib-u-dhisku waxay qaadan doontaa inta u dhaxaysa 6 iyo 8 sano.

Dabaqyada kale ama meelaha kor loogu socdo (walk-ups) Richmond, oo uu ku jiro gurigaaga, lama shaacin.

Ma jiraan wax saameyn degdeg ah oo ay ku yeelanayso qoyskaaga.

Maalmaha soo socda

Shaqaaale ka socda Homes Victoria iyo xafiiska guryeynta deegaanka ayaa diyaar ku ahaan doona dhismaha 139 Highett Street si ay uga jawaabaan su'aalo kasta.

Waxaa laga heli karaa:

- 10-ka subaxnimo ilaa 3-da galabnimo Jimcaha 20 Sebteembar
- 10-ka subaxnimo ilaa 12-ka galabnimo Sabti 21-ka Sebteembar
- 10-ka subaxnimo ilaa 3da galabnimo Isniin 23-ka Sebteembar.

Labada bilood ee soo socota

Kiraystayaasha degan **139 Highett Street** iyo **Anderson Court, Williams Court**, iyo meelaha lagu **socdo (walk-ups)** ee **Elizabeth Street** ayaa bilaabi doona howlaha guuritaanka.

Labada sano ee soo socda

Kiraystayaasha degan **139 Highett Street** iyo **Anderson Court, Williams Court**, iyo meelaha lagu **socdo (walk-ups)** ee **Elizabeth Street** ayaa u guuri doona guuryo cusub, dumintuna way bilaabmaysaa.

Waxaan la xiriiri doonaa kireystayaasha meesha ka ag dhow waqtigaas si aan kuu ogeysiino waxa aad filan karto inta lagu jiro howlaha duminta iyo dhismaha.

Goorma ayaa dabaqeenaa loo qorsheeyay in dib-u-dhis lagu sameeyo?

Lagaagama baahna inaad guurto ugu yaraan laba sano.

Hadda ma awoodno inaan ku siinno taariikhaha saxda ah ee dabaqaaga, laakiin waxaan ku siin doonaa macluumaad dheeraad ah marka la go'aamiyo marxaladda xigta ee mashruuca.

Waxaan tixgelinaa dhowr arrimood marka aan go'aansanayno marka aan dib u cusboonaysiinno dabaq kasta, oo ay ku jiraan xaaladda dhismaha, qurxinta bulshada iyo helitaanka kaydka guryaha cusub ama guryaha markaas la heli karo si loogu guuro.

Maxaa laga dhisi doonaa goobaha?

Naqshadaynta guryaha cusub lama dhamaystirin laakiin waxa ku jiri doona guryo bulsho oo casri ah oo sugan.

Waxaad heli doontaa fursad aad nagula wadaagto ra'yigaaga ku aadan naqshadeynta marka la dhammeeyo.

Maxaa ka socda goobaha kale?

Guuritaanka wayba ka bilaabatay **120 Racecourse Road** iyo **12 Holland Court, Flemington**, **33 Alfred Street, North Melbourne**.

Dib-u-dhisku wuxuu dhowaan ka bilaabmi doonaa labada goobood ee dabaqyada dhaadheer ee **20 Elgin Street** iyo **141 Nicholson Street, Carlton** halkaas oo kiraystayaasha ay mar hore ka guureen.

Sidee ku heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Mashruuca Weyn ee Guriyeynta, howlaha raritaanka iyo qorshayaasha dib-u-dhiska **139 Highett Street, Richmond** :

- Ka qaybgal xaflad bulsho oo la imaan karo ballan la'aan laguna qaban doono dhismaha **139 Highett Street, Richmond**:
 - 10-ka subaxnimo ilaa 3-da galabnimo Jimcaha 20 Sebteembar
 - 10-ka subaxnimo ilaa 12-ka galabnimo Sabti 21-ka Sebteembar
 - 10-ka subaxnimo ilaa 3da galabnimo Isniin 23-ka Sebteembar.
- Xaflado lagu heli karo macluumaad dheeraad ah ayaa la qaban doonaa toddobaadyada soo socda waqtiyadana waxaa lagu soo qiru doonaa mareegahayaga iyo boorarka dhismeyaalka
- Wac 1800 716 866 si laguugu xiro xafiiska guryeynta ee deegaankaaga (9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha). Turjubaano ayaa diyaar ah haddii loo baahdo
- Booqo websaydkayaga cusub ee bighousingbuild.homes.vic.gov.au halkaas oo aad wax ka waydiin karto kooxdayada rarida
- Email enquiries@homes.vic.gov.au.